[redacted]


# FAAFIN RASMIAH

# الجـــريدة الرســـمية

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA

لجمهـورية الصومـال الديمقراطيـة

Sannadka 4aad Muqdisho, 15 Jennayo 1976 L. 2 R. 1

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA جريـدة شـهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba —' RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


## KOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI


SHARCI L. 2 ee 5 Jennayo 1976 — *Mideynta iyo habeynta Gunnooyinka Xilka Xirfadda guriga iyo habeen-dhaxa.* Bog. 67

SHARCI L. 3 ee 5 Jennayo 1976 — *Gunnooyinka habeen-yaasha Gudiyadda G. S. K.* » 78
*Sare ee Kacaanka, kan Xoghayayaasha iyo La-Taliya-yaasha Gudiyadda G. S. K.*


### BOGGA LABAAD


XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 30 Nofembar 1975, L. 6 — *Billad Maar ah ee Hawlkarnimo.* » 79

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 2 Jennayo 1976, L. 7 — *Garsoore Xasan Yuusuf Nuur.* » 80

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 2 Jennayo 1976, L. 8 — *G.le Cali Muumin Ismail.* » 81



Madbacada Dawladda — Muqdisho

[redacted]



XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 15 Dishembar 1975, L. 9 — *Dhul Dowladeed la siiyay, Gacantana loo geliyey Jaalle Xaaji Adan Axmed «Afqolooc» ku yaal Muqdisho — Xaafadda Waberi — Waddada Maka al Makarama kuna fadhiya mq. 64.* Bog. 82

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 15 Dishembar 1975, L. 10 — *Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Xasan Maxamuud Cabdulle ku yaal Muqdisho, Xaafadda Hodan kuna fadhiya mq. 405.* » 84

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 15 Dishembar 11975, L. 11 — *Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Cabduraxmaan Dhaahir Cabdi ku yaal Muqdisho Xaafadda Xamar Jeb-Jeb kuna fadhiya mq. 545.* » 86

## BOGGA SEDDAXAAD

### TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS WIXII LA MID AH

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Jennayo 1976 — *Ogeysiis Naada Dhul Jaalle Cusmaan Kaariye Mahadalle. (18)* Bog. 88

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Jennayo 1976 — *Ogeysiis Naada Dhul Jaalle Maxamed Xasan Muuse. (19)* » 89

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Jennayo 1976 — *Ogeysiis Naada Dhul Jaalle Maxamed Xasan Muuse. (20)* » 90

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Jennayo 1976 — *Ogeysiis Naada Dhul Jaalle Xabiiba Kadhiye. (21)* » 91

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 5 Jennayo 1976, — *Lumid Jeega Warxga L. 008791 — Shs. 616,05 ee ay ledahay Dowladda Hoose ee Kismayo. (22)* » 92

# BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 2 ee 5 Jennayo 1976.

Mideynta iyo habeynta gunnooyinka xilka, xirfadda, guriga yo habeen-dhaxa.

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee soo baxay 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AKRAY Talada ay soo jeediyeen Guddiga Gunnooyinka iyo go'aanka ka soo baxay Guddiyada: Dhaqaalaha, Bulshada iyo Siyaasadda, Cadaaladda iyo Sharciga ee G. S. K.

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in la mideeyo dibna loo habeeyo gunnooyinka kala duwan ee laga qaato Dawladda.

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda oo ka soo baxay fadhigoodii 1 Jennayo 1976.

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad
*Micneyn*

Haddii aan si kale loo sheegin, erayada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida soo socota:

*«Shaqaalaha Dawladda»* Waxaa loola jeedaa shaqaalaha xubnaha Dawladda Dhexe, Wakaaladaha Madaxa Bannaan, Sharikadaha iyo Mashruucyada Dawladdu leedahay.

*«Xubnaha Dawladda»* Waxaa loola jeedaa xubnaha Dawladda Dhexe oo ay ku jiraan Wakaaladaha Madaxa Bannan, Sharikadaha iyo Mashruucyada Dawladdu leedahay.

*«Gunnada Caamka ah»* Waa midda guud ahaan saamaysa xubnaha Dawladda oo dhan.

*«Gunnada Gaarka ah»* Waa midda gaarka u ah xubnaha ku tilmaaman qod. 4aad qaybtiisa 2aad ee Sharcigan.

## Qodobka 2aad

### *Habeynta Gunnooyinka*

Sharcigan waxaa loo aqoonsanayaa kan keliya ee saameeya gunnooyinka kala duwan ee lagu tilmaamay sharcigan lagana qaato xubnaha Dawladda.

## Qodobka 3aad

### *Xubnaha lagu dhaqayo sharcigan*

1. Sharcigan waxa lagu dhaqayaa shaqaalaha joogtada ah ee Dawladda.

2. Haddii si kale aan loo sheegin, sharcigan laguma dhaqayo xubnaha Dawladda ee hoos ku sheegan.

i) Ciidamada Qalabka sida.
ii) Hay'adaha lacagta (Financial Institutions).
iii) Jaamicadda Ummadda.
iv) Sharikadaha iyo Mashruucyada Dawladda qayb ku leedahay.
v) Dawladdaha Hoose.

## Qodobka 4aad

### *Qaybaha Gunnooyinka*

1. Gunnooyinka caam ku ah dhamaan xubnaha Dawladda waa kuwa hoos ku qoran:

i) Gunnooyinka Agaasimayaasha Guud iyo Agaasimayaasha iyo jagooyinka la siman.
ii) Gunnada xirfadda ee Jaamiciinta.
iii) Gunnooyinka habeen-dhaxa Gudaha iyo Dibedda.
iv) Gunnada Wakiilada Wasaaradda iyo Wakaaladaha ee Gobollada.

2. Gunnooyinka gaarka ahi waxay saameeyaan xubnaha Dawladda ee soo socda:

i) Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.
ii) Wasaaradda Arrimaha Dibadda.
iii) Wasaaradda Caafimaadka.
iv) Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.
v) Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.
vi) Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
vii) Wasaaradda Boostada iyo Isgarsiinta.
viii) Wasaaradda Maaliyadda.
ix) Wasaaardda Gaadiidka.
x) Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha (Waaxda Jeolojiyada) iyo (Waaxda Waddooyinka).
xi) Hantidhowrka Guud.

3. Tirada lacagta ee gunnooyinka caamka ah iyo kuwa gaarka ah ee sharcigan ku xusan, waxaa si tifaftiran loogu tilmaamay lifaaqa 1aad iyo kan 2aad ee ku xiran sharcigan oo lahaan doonaa astaan Sharci.

Qodobka 5aad

*Shuruuda gunnada xirfadda ee Jaamiciinta*

1. Bixinta gunnada xirfadda ee Jaamiciinta ku tilmaaman lifaaqa 1aad ee sharcigan, waxay ku xirantahay shuruudaha soo socda:

i) waa in qofku haystaa shahaado jaamici ah oo sharci ahaan loo aqoonsaday.

ii) waa in jagada uu hayaa tahay mid u baahan cilmiga uu shahaadada ku sito.

iii) waa in derejadiisu aanay ka hoosayn «A».

2. Jaamicaanta ku soo qaatay shahaado Cilmiga Dhaqaalaha (Economics) ama tirada (Statistics) ee ka shaqeeya xubnaha Dawladda ee qaabilsan dhaqaalaha; kuwa haysta shahaado sharci ah oo ka shaqeeya Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda iyo Waaxda Xeer Dejinta ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta iyo qorayaasha (journalists) waxau xaq u yeelan karaan gunnada xirfadda haddii ay fuliyaan shuruudaha kor ku tilmaaman iyadoo isla markaas ay qasab ku tahay in la helo oggolaanshaha Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo dhegeystay talada Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda.

Qodobka 6aad

*Burin Sharciyadii hore*

1. Waxaa la buriyey sharci kasta ama xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

2. Gaar ahaan waxaa la buriyey:

i) Sharci kasta ee hore ee ku saabsan gunnooyinka sharcigan ku tilmaaman.

ii) Sharciga lamb. 8 ee soo baxay 1dii Junyo 1965 iyo beddelaadii ka dambeyay.

iii) Xeerka lamb. 212 ee soo baxay 14 Sebtembre 1965.

Qodobka 7aad

*Dhaqan gelid*

1. Sharcigan waxa lagu dhaqayaa shaqaalaha Dawladda oo dhan oo ay ku jiraan kuwa shaqeeya iyo kuwa la qori doono.

2. Sharciganu wuxuu dhaqan galayaa kowda Jannaayo 1976.

3. Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Mu qdisho, 5 Jennaayo 1976.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle Si Gaas Maxamed Siyaad Barre*

# LIFAAQA KOOWAAD

*Gunnooyinka Caamka u ah Wasaaradaha iyo Xubnaha kale ee Dawladda iyo Wakaaladaha Madax Bannaan*

1. Gunnooyinka xilka iyo Guriga ee Agaasimayaasha Guud iyo Agaasimayaasha:

B. — Gunnooyinka xilka iyo guriga ee Agaasimayaasha Guud iyo Agaasimayaasha Wasaaradaha iyo Xubnaha kale ee Dawladda waxay u kala baxaan laba qaybood oo kala ah:

| | | *Xil* | *Guri* |
|---|---|---|---|
| i) | Hantidhowrka Guud iyo Garyaqaanka Guud | 800 | 500 |
| ii) | Agaasime Guud | 500 | 500 |
| iii) | Agaasime | 400 | 300 |

t) Gunnooyinka xilka iyo guriga ee Mareeyayaasha Guud iyo Mareeyayaasha Wakaaladaha Madax Bannaani waxay ku tilmaamanyihiin xeerka lambarkiisu 74 ee soo baxay 22 Abrile 1972 iyo beddelaadii ka dambeysay (eeg Lifaaqa «A» iyo «B» Xeerka lamb. 74 ee 22 Abrile 1972).

j) Gunnooyinkaas waxaa kaloo qaadan kara qofkii rasmi ahaan ku meel gaar ahaan lagu magacaabo jagooyinka kor ku tilmaaman.

Gunnooyinkaasi waa kuwo ku xiran jagooyinkaas ee ma aha kuwo qofku shaqsi ahaan xaq u leeyahay.

2. Gunnada Xirfadda ee Jaamiciinta Sh. So. 700 oo xir. ah.

Gunnadaasu waxay saameysaa oo keliya Jaamiciinta sita shahaado Jaamici ah oo sharci ahaan loo aqoonsaday, waxayna ka kooban yihiin:

i) kuwa soo bartay daawada (medicina), daawada xoolaha (veterinary), cilmiga kimika (chemistry), Cilmiga daawooyinka (farmacy), cilmiga beeraha (agronomy), farsamada (engineering) iyo (geology).

ii) kuwa sita shahaado Jaamacadeed oo barayaal ka ah Dugsiyada Sare, ama buugaag qora ama Manhaj (syllabus) qora ama kormeerayaal ka ah Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

iii) kuwa haysta shahaado sharci kana shaqeeya Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, Garsoore ahaan.

iv) kuwa haysta shahaado sharci kana shaqeeya Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda iyo Waaxda Xeer Dejinta ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

v) kuwa haysta shahaado dhaqaale (economics) ama tirada (statistics) ee ka shaqeeya jago xirfad dhaqaale ama tiro u baahan.

vi) kuwa haysta shahqdo qore (Degree in Journalism) kana shaqeeya Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.

vii) bixinta gunnooyinka ku tilmaaman qaybaha (iv), (v) iyo (vi) ee qodobkan waxay ku xirantahay shuruudaha ku sheegan qodobka (2) ee sharcigan.

3. Gunnada habeen dhaxa ee gudaha iyo dibadda.

Shaqaalaha Dawladda oo dhan ha ka shaqeeyaan Wasaaradaha ama Wakaaladaha waxay ka wada simanyihiin gunnada habeen dhaxa gudaha iyo tan dibadda. Waxa shardi ah inaan la bixin karin gunnadaas haddii aanu jirin amar rasmi ah inuu qofku ka maqnaado magaaladii uu ka shaqaynayey hawl daraadeed.

I. — *Gunnada habeen dhaxa gudaha:*

b) Gunnada habeen dhaxa gudaha waxay u kala qaybsantahay sidasoo socota:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| i) | A-1, A-2, A-3 | Shs. So. | 20 | maalintiiba |
| ii) | A-4, A-5, A-6 | » | 12 | » |
| iii) | A-7, B-7, A-8, B-8, C-8, A-9, B-9, C-9 | » | 8 | » |
| iv) | B-10, C-11, D-11, D-12 | » | 6 | » |
| v) | D-13, D-14 | » | 4 | » |

t) Shurudaha lagu bixinayo gunnadan waxay yihiin:
— 15ka maalmood ee hore gunno buuxda,
— 15ka maalmood ee xigta gunno nus ah, wixii intaa ka danbeeyana waa go'aysaa gunnado.

j) Hase yeeshee, haddii muddada kor ku sheegan mid ka badan hawsha la soo qabanayaa uu baahantahay waa in ogolaansho gaara la warsadaa Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda intaan la aadin socdaalka ka hor.

x) Gunnooyinka habeen dhaha gudaha ee u gaarka ah Waavda Jeolojiyada ee Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo Waaxda Waddooyinka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Waxaa ka fiirisaa bogga u danbeeyey.

II. — *Gunnada habeen dhaxa Dibadda.*

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| b) | Agaasimayaasha Guud iyo Jagooyinka la siman ee Dawladda Dhexe iyo Wakaaladaha | Shs. | 300 | maalintii |
| t) | Shaqaalaha kal edoreją kasta ha ahaadeenee | » | 240 | » |

4. Gunnooyinka Wakiilada Gobollada ee Wasaaradaha iyo Wakaaladaha:

b) Wakiilada Wasaaradaha iyo Wakaaladaha masuul uga ah Gobbollada waxay xaq u leeyihiin gunnooyin gaar ah oo bishiiba dhan:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Gunno xil | Shs. 200 |
| ii) | Gunno guri | » 200 |

t) Bixinta gunnooyinkanu waxay ku xirantahay in Degmooyinka Gobolku ka koobanyahay oo dhan hawsha Wasaaraddu ama Wakaaladdu ka socoto, shaqaalena ka joogo Degmooyinka oo dhan ama ugu yaraan boqolkiiba 50%. Taas oo laga rabo in Wasaaradda ama Wakaaladda gunnooyinka warsanaysaa u caddeyso Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda intaan Gunnooyin bixintooda la ogolaan.

j) Qofkii gunno kale qaataa nooc kastaba ha ahaatee gunnooyinkan ma qaadan karo.

---

## LAFAAGA LABAAD

*Gunnooyinka gaar ah ee Saameeya Wasaaradaha iyo Xubnaha Dawladda Qaarkood*

1. — *Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta (W.W.B.).*

Gunnooyinkaas waxay u kala baxaan sida hoos ku qoran:

b) Gunnada Maamulayaasha Dugsiyada.
Gunnadaasu waxay ku xirantahay tirada fasallada sida soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Maamulayaasha Dug. 4 fasal ilaa 16 bishiiba | Shs. 75 |
| ii) | Maamulayaasha Dug. 17 fasal ilaa 22 fasal bishiiba | » 100 |
| iii) | Maamulayaasha Dug. 23 fasal iyo wixii ka badan | » 125 |
| iv) | Maamulayaasha Dugsiyadala seexdo | » 100 |

t) Gunnada Kormeerayaasha iyo Madaxda Gobollada ee (W.W.B).
Gunnadani waxay ka koobantahay:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Gunno xil | Shs. 200 bishii |
| ii) | Gunno guri | » 200 » |

Qofka xaq u yeelanaaya gunnadaas:

— waa in loo mgaacaabo jago kormeere ama Madax Gobol ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta;

— waa inu aqoon dheer iyo waayo aragnimo ballaaran u leeyahay shaqada waxbarashada;

— waa inaanu ka mid ahayn jaamiciinta qaata gunnada xirfada.

j) Gunnada jeesada.

Gunnada jeesadu waxay u kale baxaysaa sida soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Macalinka Dugsiyada sare wax dhiga ee aan Jaamici ahayn, hase yeeshee gaarey derejada «A» bilkasta | Shs. 50 |
| ii) | Macalinka Dugsiyada Dhexe iyo kuwa hoose wax ka dhiga ee derejada «B» bilkasta | » 40 |
| iii) | Macalinka Dugsiyada Hoose wax ka dhiga ee ah derejada «C» bilkasta | » 20 |

2. — *Wasaaradda Arrimaha Dibadda.*

Gunnooyinkanu waxay u kale baxaan sida soo socota:

b) Gunnada sirta (cypher office) ee xarunta Wasaaradda: Gunnadani waxay u kala baxaysaa laba:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Madaxda Xafiiska bilkasta | Shs. 250 |
| ii) | Sarkaal fuliye ah | » 150 |

t) Gunnooyinka Joogtada ah ay qaataan Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha J.D.S. waxba lagama beddelin.

3. — *Wasaaradda Caafimaadka.*

Gunnooyinka Wasaaradda gaarka u ahi waxay u kala baxaaan sida hoos ku qoran:

b) Gunnada Madaxda Maamulka Isbitaalada ee aan gunnada xirfadda ee Jaamiciinta qaadan:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Gunno xil | Shs. 150 |
| ii) | Gunno guri | » 100 |

Gunnada waxa la siinayaa Madaxda Maamulka Isbitaalada ee muddo dheer ka soo shaqeeyey Caafimaadka waayo aragnimana u leh shaqada.

t) Gunnada Caafimaadka:
Gunnadan waxa loo bixiyaa sida soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Derejada «A» (aan gunno Jaamici qaadan) | Shs. 40 |
| ii) | Derejada «B» | » 30 |
| iii) | Umuliso | » 25 |
| iv) | Kalkaaliye Hoose «C» | » 20 |
| v) | Shaqaalaha Hoose ee derejadooda thay «D» | » 20 |

j) Gunnada Cudurrada faafa:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Takhtarrada ka shaqeeya Isbitaalada cudurrada faafa bil kasta | Shs. 200 |
| ii) | Shaqaalaha kale bil kasta | » 50 |

Shaqaalaha gunnadan qaataa ma qaadanayaan gunnada caafimaadka.

4. — *Wasaaradda Warfqfinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.*

b) Gunnada ay bixiso Wasaaraddu, waxay ku xirantahay Shuruudaha hoos ku qoran:

i) Qof gunno kale qaataa inuusan tan qaadan.
ii) Gunnadu inayan ka badan mushahaarada qofku qaato.

t) Gunnale Wasaaraddu waxay u kale qaybsantahay sida soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Barnaamij soo-saare sare, wartifaftirayaal, farsama-yaqaan sare, qore sare bishiiba | Shs. 350 |
| ii) | Barnaamij soo saare, Qore, Kaydiye Cajaladeed, nabad-ilaaliye | » 250 |
| iii) | Farsamoyaqaan 1aad | » 230 |
| iv) | Farsamoyaqaan 2aad, weriye, saxe, buugkeydiye | » 200 |
| v) | Farsamoyaqaan 3aad | » 150 |
| vi) | Qaybiye, weriye 2aad | » 125 |
| vii) | Daabace | » 90 |
| viii) | Shufeer | » 60 |

5. — *Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.*

Gunnooyinkan u gaarka ah Wasaaraddu waxay ka koobanyihiin:

b) Gunnada Guddoomiyaha Maxkamadda Sare:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Gunnada xilka | Shs. 1.800 |
| ii) | Gunnada guriga | » 500 |

t) Qunnada ku-Xigeenka Guddoomiyaha Maxkamadda Sare:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Gunnada kursiga | Shs. 1.400 |
| ii) | Gunnada guriga | » 500 |

j) Gunnada Xeer-Ilaaliyaha Guud:

Gunnada la siinaayo Xeer-Ilaaliyaha Guud waxay la mid tahay tan caadiga ah ee ay qaataan Agaasimayaasha ee Wasaaradaha ee ku tilmaaman lifaaqa 1aad.

x) Garsoorayaasha Jaamiciinta ah:

Garsoorayaasha Jaamiciinta ahi waxay gunno qaadashada kala mid yihiin Jaamiciinata kale waxanay qaadanayaan gunnada ku tilmaaman Qod. 5aad ee Sharcigan, taas oo dhan bishiiba — Shs. 700

kh) Guddoomiyayaasha Maxkamadda Rafcaanka ee aan jaamiciinta ahayn:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Gunnada toogada | Shs. 400 |
| ii) | Gunno guri | » 300 |

d) Garsoorayaasha Maxkamadda Rafcaanka iyo Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Gobollada ee aan ahayn jaamiciinta:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Gunno toogo | Shs. 300 |
| ii) | Gunno guri | » 200 |

r) Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Degmooyinka ee aan jaamiciinta ahayn:

| | | |
|---|---|---|
| i) | Gunnata toogo | Shs. 200 |
| ii) | Gunnada guriga | » 100 |

s) Garsoorayaasha Maxkamadda Degmooyinka ee aan ahayn jaamiciinta:

Gunno toogo bishiiba — Shs. 200

6. — *Wasaaradda Arrimaha Gudaha:*

| | *Jago* | *Xil* | *Guri* |
|---|---|---|---|
| i) | Guddoomiye Gobol. | 800 | iyo guri dawladeed |
| ii) | Guddoomiye degmo | 600 | iyo guri dawladeed |
| iii) | Xoghayaha Guddiga Gobolka | 300 | 300 |
| iv) | Xoghaye Degm o«A» | 200 | 200 |
| v) | Xoghaye Degmo «B» | 150 | 150 |
| vi) | Xoghaye Degmo «C» | 100 | 100 |

7. — *Wasaaradda Boostada iyo Isgarsiinta:*

Gunnooyinka Wasaaraddan-u gaarka ahi waa kuwa hoos ku tilmaaman:

| Jago | Xil | Xirfo |
|---|---|---|
| i) Madaxa Khasnadda Dhexe | 200 | — |
| ii) Madaxa X. Kormeerka | 300 | — |
| iii) Madaxa Xub. Xisaabaha | 150 | — |
| iv) Madaxa Faracyada Xisaabaha | 100 | — |
| v) Maamulaha Boostada Gobolka | 150 | — |
| iv) Madaxa Faracyada Xisaabaha | 100 | — |
| vii) Maamulaha Boostada Tuulada | 40 | — |
| viii) Farsamayaqaan Filatelig oo sare | — | 150 |
| ix) Farsamayaqaan Elektronik Tech. sare | — | 150 |
| x) Farsamayaqaan Elektronik Tech. | — | 100 |

8. — *Wasaaradda Maaliyadda.*

Gunnooyinka Wasaaradddan u gaarka ahi waa kuwa hoose ku til maa-man:

b) Waaxda Xisaabiyaha Guud:

| Jago | Xil | Guri |
|---|---|---|
| i) Ku-Xigeenka Xisaabiyaha Guud | 300 | 300 |
| ii) Xisaabiye Sare | 300 | 200 |
| iii) Xisaabiyaal | 200 | 100 |
| iv) Kaaliye xisaabiyayaal iyo hubiyayaal | 200 | — |

t) Waaxda Furdooyinka:

| | | |
|---|---|---|
| i) Madax Furdadeed Cl. I | Shs. 200 | 200 |
| ii) Madax Furdadeed Cl. II | » 200 | 100 |
| iii) Madax Furdadeed Cl. III iyo IV | » 200 | — |
| iv) Ururiye-Lacag Haye | » 150 | — |

j) Waaxda Cashuuraha Berriga:

| | | |
|---|---|---|
| i) Madax Cashuur Gobol | Shs. 200 | 200 |
| ii) Madax Cashuur Deg. iyo Madax xubin | » 200 | 100 |
| iii) Hubiye Cashuureed | » 200 | — |
| iv) Ururiye-Lacag haye | » 150 | — |

x) Xisaabiyaalka iyo Lacag-Bixyaasha Wasaaradda iyo Wakaaladaha:

| | Xil | Guri |
|---|---|---|
| Xisaabiye | 200 | 100 |
| Kaaliye xisaabiye | 200 | — |
| Lacag bixiye | 150 | — |

Xisaabiyaalka iyo Kaaliyayaasha xisaabiyaha waxa lagu magacaabi doona xeerka ruu soo saaro Xoghayaha Wasaaradda Maaliyaddu iyadoo la tixgelinayo heerka aqoontooda iyo waayo aragnimadooda.

9. — *Wasaaradda Gaadiidka.*

Gunnada Wasaaradda u gaarka ahi waa midda la siiyo shaqaalaha Waaxda Duulista iyo hawada qaarkood waxana loo bixinayaa sida soo socota:

| | *Jago* | *Gunno xirfo* | |
|---|---|---|---|
| i) | Kormeeraha maritaanka cirka | Shs. | 150 |
| ii) | Hoggaamiyaha maritaanka cirka | » | 100 |
| iii) | Saadiye hawo | » | 150 |
| iv) | Kaaliye saadiye hawo | » | 100 |
| v) | Elektronik Tech. Sare | » | 150 |
| vi) | Elektronik Tech. | » | 100 |
| vii) | Madax kooxda Dab-damiska | » | 75 |
| viii) | Dab-damiye | » | 50 |

10. — *Wasaaradda Macdanta iyo biyaha (Waaxda Jeolojiyada) iyo Wasaaradda Hawlaha Guud (Waaxda Waddooyinka).*

b) Gunnadani waxay u gaar tahay shaqaalaha Waaxda Jeolojiyada ee Wasaaradda Macdanta iyo biyaha iyo Waaxda Waddooyinka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxana loo bixinayaa bedelkii habeen dhaxa gudaha (instaad of internal travelling allowance) waana sida soo socota:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| i) | Shaqaalaha derejada «A» | Shs. | 200 | bishiiba |
| ii) | Shaqaalaha derejada «B» iyo «C9» | » | 170 | » |
| iii) | Shaqqaalaha darejada «C» | » | 120 | » |
| iv) | Shaqaalaha derejada «D» | » | 90 | » |

t) Muddada uu duurka ka shaqaynayo waa in si joogto ah qofka gunnada loo siiyaa laakiin marka uu duurka kasoo laabto waa in laga joojiyaa.

11. — *Haniidhawrka Guudu.*

| | | | *Xil* | *Guri* |
|---|---|---|---|---|
| i) | Hantidhawre Sare | Shs. | 300 | 200 |
| ii) | Hantidhakwre | » | 200 | 100 |
| iii) | Baare Sare | » | 200 | — |
| iv) | Baare | » | 200 | — |

SHARCI L. 3 ee 5 Jennayo 1976.

Gunnfiyinka habeen- dhaxa Gudaha iyo Dibedda oo Xildhibaanada, Golaha Sare ee Kacaanka, kan, Xoghayayaasha, iyo La-Taliyayaasha Guddiyadda G.S.K.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee soo baxay 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Talada ay soo jeediyeen Guddiga Gunnooyinka iyo Go'aanka ka soo baxay Guddiyada: Dhaqaalaha, Bulshada iyo Siyaasadda, Cadaaladda iyo Sharciga ee G. S. K.;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in la mideeyo dibna loo habeeyo gunnooyinka kala duwan ee laga qaato Dawladda;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda oo ka soo baxay fadhigoodi 1-11-976;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Gunno habeen dhax*

Gunnooyinka Xildhibaannadda G. S. K., kan Xoghayayaasha Dawladda iyo La-Taliyayaasha Guddiyada G. S. K. waa sida hoos ku tilmaaman:

1. Gunnada habeen dhaxa gudaha waa boqol (10) shilin maalin walba.
2. Gunnada habeen dhaxa dibaadda waa afar boqol iyo konton (450) shilin maalinwalba.

Qodobka 2aad

*Burin Sharciyaddii hore*

Waxaa la buriyey Sharci kasta ama xeer kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 3aad

*Dhagan gelid*

1. Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa 1 Jennayo 1976.
2. Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Jennaayo 1976.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

# BOGGA LABAAD

**XEER L. 6 ee 30 Nofembar 1975.**
**Billad Maar ah ee Hawlkarnimo.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo Tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAYSharciga L. 1 ee 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 65 ee 18kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY Sida xilkasnimada, kartida iyo habsamida dheeraadka ah leh ee Jaallayaasha hoos ku magacaaban ay u guteen hawlihii adkaa ee la xiriiray daadgureynta dadkii abaaruhu ay waxyeelleeyeen;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan in ay tahay in xusuus gaar ah loo yeesho qof alla qofkii Ummaddiisa hawlo dhaxal gal ah u qabto:

MARKUU DHEGEYSTEY Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOMIYEY

Qodobka keliya

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah ee Hawlkarnimo Jaallayaasha:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 1. | G. Sare Cusmaan Saalax Cabdikariim — | Xogga | Dalka | Soomaaliyed |
| 2. | G. Maxamad Aadan Cabdulle | » | » | » |
| 3. | G. Axmed Maxamad Sh?kh | » | » | » |
| 4. | G. Sare Aeemed Cali Yuusuf | » | » | » |
| 5. | G. Axmed Xaaji Maxamud | » | » | » |
| 6. | G. Xersi Jaamac Bood | » | » | » |
| 7. | Dhamme Maxamed Weli | » | » | » |
| 8. | 2-Xid. Khaliif Maxamad | » | » | » |
| 9. | Alifle X. 3844 Ciise Raage Ciise | » | » | » |
| 10. | Xarigle X. 9396 Maxamed Cali | » | » | » |
| 11. | Alifle X. 5012 Cabdi Caddow Waasuge | » | » | » |
| 12. | Dhamme Maxamad Cismaan | » | » | » |
| 13. | G. Maxamed Shekh Yuusuf | » | » | » |
| 14. | 2-Xid. Cabdinaasir Xaaji Xaashi | » | » | » |
| 15. | M.le X. 1946 Maxamad Cali | » | » | » |
| 16. | L.le X. 10165 Ciise Aadan | » | » | » |
| 17. | L.le X. 112 Jaamac Jeyte | » | » | » |

Muqdisho, 30 Nofembar 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

XEER L. 7 ee 2 Jennayo 1976.

Garsoore: Xasan Yuusuf Nuur.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Koowaad iyo tan 2aad ee Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii;

MARKUU ARKAY Sharciga lagu dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Muqdisho ee tirsigiisu yahay 3, soona baxay 10-1-1970;

MARKUU TIXGELIYAY In loo baahan yahay in Maxkamadda Badbaadada Xamar loo magacaabo Guddoomiye Ku-Xigeen;

MARKUU DHEGEYSTAY Ra'yiga Guddoonshaha Maeekamadda Badbaadada Dalka.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qodobka 1aad

In Xasan Yuusuf Nuur, oo ah Garsoore ka tirsan Maxkamadda Badbaadada Xamar, lagu magacaabo Guddoomiye Ku-Xigaha isla Maxkamadda kor lagu sheegay, marka laga billaabo taarikhda Dekereetadan.

Qodobka 2aad

Dekereetadan waxaa lagu faafin doonaa «Faafinta Rasmiga ah» ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 2 Jannayo 1976.

MAADXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, Bogga lamb. 12.*
*Muqdisho, 4 Jannayo 1976.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdiillaahi Warsame Nuur

XEER L. 8 ee 2 Jennayo 1976.
G.le Cali Muumin Ismaaciil.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Koowaad iyo tan 2aad ee Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii;

MARKUU ARKAY Sharciga lagu dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Muqdisho ee tirsigiisu yahay 3, soona baxay 10-1-1970;

MARKUU TIXGELIYAY In G.le Cali Muumin Ismaaciil horay u weydiistay inuu shaqada uu Maxkamadda Badbaadada Xamar ka hayo ka wareego Wasaaradda Gaashaandhiggaana u noqdo;

MARKUU DHEGEYSTAY Ra'yiga Guddoonshaha Maxkamadda Badbaadada Dalka;

WUXUU GUDDONSHAY

Qodobka 1aad

In G.le Cali Muumin Ismaaciil oo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, Maxkamadda Badbaadada Xamarna Garsoore ka ah, laga wareejiyo hawsha uu Maxkamadda ka hayo, loona caliyo Wasaaradda Gaashaandhiga, marka laga billaabo taariikhda Dekereetadan.

Qodobka 2aad

Dekereetadan waxaa lagu faafin doonaa «Faafinta Rasmiga ah» ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 2 Jannayo 1976.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, Bogga lamb. 11.*
*Muqdisho, 4 Jannayo 1976.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

XEER L. 9 ee 15 Dishembar 1975.

**Dhuul Dowladeed la siiyay, gacantana loo gelíyay Jaalle Xaaji Adan Axmed «Afqalooc» ku yaal Muqdisho — Xaafadda Waberi — Waddada Maĉa Al Mukarama, kuna fdhiya mq. 64.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 soona baxay 1 Nofembar 1973;
ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 5 soona baxay 9 Jannayo 1967;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Xaaji Adan Axmed «Afqalooc» aarikhdu markay aheyd 30-8-1973 kuna weydiistay dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Jidka Maka Al Mukarama;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 18 soona baxday 29 Sebtember 1973, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Warqadda soo qortay Xafiiska Dowladda Hoose lamb. DHM-XG-642 taarikhdeeduna ahayd 16-10-1975, kuna saabsaneyd in Dowladdu ay Guri tabaruc oga dhisto Xaaji Aadan Axmed «Afqalooc»;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar — Xaafadda Waberi — Jidka Maka Al Mukarama, laguna siiyay xaashid lamb. HD-10107 W-DH-75 taarikhdiisuna ay aheyd 10 Nofembar 1975, oo ay siisay Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 138083 ee 16-3-1973, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Xaaji Aadan Axmed «Afqalooc» uu bixiyay lacag dhan Sh. So.192, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 64, loona tiriyay Xaaji Aadan Axmed «Afqalooc» sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 14-3-1974;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka oo ay ujieeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saarayaa;

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay loona aqoonsaday Xaaji Aadan Axmed «Afqalooc», dhul ku fadhiya mq. 64, kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Waberi — Waddada Maka Al Mukarama.

Muqoisho, 15 Dishembar 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaale Madar*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*

*Diiwaanka lamb. 1, Bogga lamb. 38.*

*Muqdisho, 21 Dishembar 1975.*

*Hantidhawrka Guud:*

G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

XEER L. 10 ee 15 Dishembar 1975.

Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera dispopnibilità) Jaalle Cabduraxmaan Dhaahir Cabdi ku yaal Muqdisho, Xaafadda Xamar Jeb-Jeb — kuna fadhiya mq. 345.

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqadii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 115 soona baxay 13-9-1956;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Cabduraxmaan Dhaahir Cabdi, taarikhdu markay aheyd 3-7-1957, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho —Xaafadda Xamar Jeb-Jeb — kuna dhacaaya qaybta V°.

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 5 ee 2 Maajo 1958, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 5444, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 222°aad taarikhduna aheyd 23 Maajo 1958;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 14013 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 5444 laguna aqoonsaday fadhigii 320° ee Guddiga Dhismaha Dowladda Hoose, tarikhdu markay aheyd 14 Oktoobar 1963, kuna saabsaneed dhismo Guuri;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 17641 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 5444 laguna aqoonsaday fadhigii 66°aad ee Guddiga Dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay aheyd 7 Maarso 1966, kuna saabsaneed dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Bolletada lamb. 298 ee 21 Junyo 1958 kana soo baxaday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddelneysa in Cabduraxmaan Dhaahir Cabdi uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 517,50, kunua saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 345, loona tiriyay Cabduraxmaan Dhaahir Cabdi sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) tqrikhdeeduna aheyd 1° Luglio 1958;

ISGAA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna aheyd 3-12-1975, taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaaden Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lambarkoodu 14013 iyo 1764 laguuna haqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggalaanta (Nulla Osta) dagganaashada Guriga ku dhisan Xamar, Xaafadda Xamar Jeb-Jeb laguna siiayay xaashida lamb: 3442 ee 14 Abrile 1959 Dowladda Hoose ee Xamar ee waafaqsan nidaamaka dhismaha;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladeed, (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) loona aqoonsaday Cabduraxmaan Dhahir Cabdi, dhul ku fadhiya mq. 345, kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Xamar Jeb-Jeb.

Muqdisho, 15 Dishembar 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaale Madar*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwanka lamb. 1, Bogga lamb.37.*
*Muqdisho, 21 Dishembar 1975.*
*Hantidhawrka Guud:*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

XEER L. 11 ee 15 Dishembar 1975.

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente disponibilità) Jaalle Xasan Maxamuud Cabdulle ku yaal Muqdisho, Xaafadda Hodan kuna fadhiya mq. 405.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqadii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxay 23 Maajo 1961;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Xasan Moxamuud Cabdulle, taarikhdu markay aheyd 23-8-1965, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan kuna dhacaaya qaybta VI° Periferica Transitoria;

ISAGA AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda. lamb. soona baxday iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 33( kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddigo dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 6°aad taarikhduna aheyd 18 Abrile 1966;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 9965 taas oo beddeshay middi hore oo lambarkeedu ahaa 33 laguna aqoonsaday fadhigii 31°aad ee Guddiga Dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay aheyd 28 Oktoobar 1975, kuna saabsaneed dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Bolletada lamb. 67163 ee 11-8-1966 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Xasan Moxamuud Cabdulle uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 405, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 405 loona tiriyay Xasan Moxamuud Cabdulle sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhuulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 20 Agosto 1966;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna aheyd 3-12-1975, taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar I. 9965 ee 15-10-1975 laguna haqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashadda guriga ku dhisan Xamar — Xaafadda Hodan — laguna saayay xaashida lamb. 9827 ee 16 Nofembar 1975 Dowladda Hoose ee Xamar waafaqsan nidaamaka dhismaha;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo sarayaa;

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyey (Concessione e libera disponibilità) loona aqoonsaday Xasan Maxamuud Cabdulle, dhul ku fadhiya mq. 405, kuna yaa lMuqdisho — Xaafadda Hodan.

Muqdisho, 15 Dishembar 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaale Madar*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*

*Diiwaanka lamb. 1, Bogga lamb. 36.*

*Muqdisho, 21 Dishembar 1975.*

*Hantidhawrka Guud:*

G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

# BOGGA SEDDAXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS WIXII LA MID AH

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### *N A A D A   D H U L*

Dhammaan dadweynaha degan degmada Duusa-mareeb waxaa la ogeysiinayaa in Jaalle Cusmaan Kaariye Mahadalle uu soo weydiistay sida xeerku yahay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmada Dhuusa Mareeb xaafadda Dayax taarikhdu markay ahayd 2-10-1975, dhulkaasoo qaabkiisu yahay rektangolaar addimihiisu yihiin 30x25 kuna fadhiya 150 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: X. Xannaanada Xoolaha Dh. iyo Daaqa.

Koofur waxaa ka xiga: Maxamed Cali Maxamed.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dowladeed.

Bari waxaa ka xiga: Jidka is-ku xira Xamar iyo Gaalkacyo.

Sidaas awgeed qofkii daneynaaya cadkaas dhulka ah wuxuu ka doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo taariikhdu markay ahay 1-11-1975 Illaa 1-12-1975, waxaana si fiican looga arkii karaa naqshadda dhulka oo taal Xafiiska Dowladda Hoose ee degmada Dhuusa Mareeb.

Guddoomiyaha Degmada Dhuusa Mareeb

*Jaalle Maxamuud Maxamed Ismaaciil*

*(18)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A D H U L*

Dhamaan dadweynaha degan degmada Dhuusa Mareb waxaa la ogeysiinayaa in Jaalle Maxamed Xasan Muuse uu soo weydiistay sida xeerku yahay, gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Dhuusa Mareeb Xaafadda Dayax taariikhdu markay ahayd 29-10-1975; dhulkaasoo qaabkiisu yahay rektangolaar addimihiisu yihiin 24x37,50 kuna fadhiya 900 mdh. soohdihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Makhaayadda Xaashi Guutaale iyo Tarafikada.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Galbeed waxaa ka xiga: Makhaayadda Biyod Tarabbi.

Bari waxaa ka xiga: Jid. iyo dugsi quraan.

Sidaas awgeed qofkii daneynaaya cadkaas dhulka ah wuxuu ka doodi kara muddo 30 (soddon) maalmood oo laga bilaabo maalinta taariikhdu ay tahay 1-11-1975 Illaa 2-12-1975 waxaana si fiican looga arki karaa naqshadda dhulkaas xafiiska Dowladda Hoose ee degmada Dhuusa Mareeb.

Guddoomiyaha Degmada Dhuusa Mareeb
*Jaalle Maxamuud Maxamed Ismaaciil*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

## *N A A D A   D H U L*

Dhamaan dadweynaha degan degmada Dhuusa Mareeb waxaa la ogeysiinayaa in Jaalle Maxamed Xasan Muuse uu soo weydiistay sida xeerku yahay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal degmada Dhuusa Mareeb Xaafadda Dayax taariikhdu markey ahayd 20-10-1975, qaabkiisuna yahay rektangoaar addimihiisu yihiin 23,50x15 kuna fadhiya 352,50 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooy waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Koofur waxaa ka xiga: Suuqa Xoolaha.

Galbeed waxaa ka xiga: Xasan Cigaal.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Sidaas awgeed qofkii daneynaaya cadkaas dhulka ah wuxuu ka doodi karaa muddo 30 ((soddon) Maalmood ah oo laga billaabo maalinta taariikhdu ay tahay 1-11-1975 illaa 1-12-1975, waxaana si fiican looga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Xafiiska Dowladda Hoose ee degmada Dhuusa Mareeb.

Guddoomiyaha Degmada Dhuusa Mareeb

*Jaalle Maxamuud Maxamed Ismaaciil*

*(20)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

## *N A A D A D H U L*

Dhamaan dadweynaha degan degmada Belet Weyne waxaal a ogeysiinayaa in Jaalle Xabiiba Kaahiye Cali ilo Caasha Kaahiye Cali ay soo weydiisteen sida xeerku yahay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmada Belet Weyne Xaafadda Buulo Kheyr taariikhdu markay ahayd 27-11-1971 oo qaabkiisu yahay rektangolaar addimihiisu yihiin 20x16 kuna fadhiya 320 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxa ka xiga: Xersiya Xayle.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxa ka xiga: Xaaji Maxamed.

Sidaas awgeed qofkii daneynaaya cadkaas dhulka ah wuxuu ka doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta tqriikh-

du ay tahay 1-12-1971 illaa 1-1-1972.

Guddoomiyaha Degmada Belet Weyne

*Cap. Xasan Aby Maxamed*

*(21)*

## GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran:

MARKUU OGAADAY: waxa ay ku saabsan tahay, arkayna warqaddii Bankiga Dhexe ee Soomaaliya (eeg warq. lam. HB-50-49) wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

HADDU ARKAY: qod. 69 D. L. 9-9-65, n. 2;

## WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda jeegga wareega ee lamb. 008791 kuna qornayd lacag tiradeedu tahay Shs. 616,05 (lixboqoltobaniyolixiyo) taano) iskana lahayd Dawladdaa Hoose ee Kismaayo.

## WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo jeeg wareega ee cusub badalkii lumay, 30 maalmood ka dib markii markan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

## WAXAA L CODSANAYAA

In jeegga wareega ee cusub oo la semeyn doono gacanta laga saaro Dawladda Hoose ee Kismaayo ama cid ayada wakaalad Sharci ah ka sidata.

Xamar, 5 Jannayo 1976.

Garsooraha Maxkamadda Gobolka

*Cabdullahi Daahir Barre.*

*(22)*